Xafiiska u Dooda Bukaanka Cudurrada Maskaxda

TILMAAN BIXIYE

Arjiyada Xuquuqda Aadamiga: Takoorista iyo Xadgudubka

DIGNIIN: **Macluumaadka ku qoran tilmaan-bixiyahan (guide) waa macluumaad guud oo keliya, mase aha talooyin sharciyeed oo la xiriira xaaladda adiga ku quseysa. Haddi aad dooneyso talooyin sharciyeed oo xaaladaada gaarka ah ku aadan, waa in la tashataa qof qareen ah, ama howlwadeen ku takhasusay sharuucda.**

Waa Maxay Sharciga Xuquuqdaada Aadamiga Ontario?

- Sharciga Xuquuqdaada Aadamiga Ontario (the *Code*) waa sharci muhiim ah oo qofkasta ee ku nool Ontario ka badbaadinayo ficillada takoorista (discrimination) iyo xadgudubyadaba (harassment). Dhamaan sharuucda Ontario waa iney waafaqaan sharcigan.

- Laga bilaabo 30ka Juun 2008, waxaa ka hirgeliyay Ontario sharci cusub ee xuquuqdaada aadamiga. Taariikhdaas kaddib, Guddiga Xuquuqdaada Aadamiga ma baari doono dacwooyinka xuquuqdaada aadamiga, waxaase arjiyaadaas toos loogu gudbindoonaa Maxkamadda Xuquuqdaada Aadamiga Ontario. Waxaa la sameeyay xafiis cusub, Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga, oo dadka la xaqiray ka caawinidoona habka ay Maxkamadda ugu gudbin doonaan arjiyadooda.

- **Maxkamadda Xuquuqdaada Aadamiga Ontario** ayaa mas'uul ka ah dhorista, xaqiijinta iyo hirgelinta sharuucda Xuquuqda Aadamiga.

- Waxaad dacwadaada u gudbin kartaa Maxkamadda haddii aad aminsan tahay in takoorid laguugu sameeyay iyadoo sabab u ah: midibkaada, jinsigaada, dooqaada galmadaada, asalkaada, asal ahaan ka timid ama qolada aad kasoo jeedo, xaaladdaada qoyseed (is-gashaansi, garoobnimo), cimrigaada, curyaanimadaada, heerka dhaqaale ee qoyskaada, ama diintaada. Sidoo kale, waad dacwoon kartaa haddii guri laguu diido iyadoo marmarsiinyo laga dhigananayo lacagta gargaarka dowladda qaadashadeeda awgeed, ama la eegayo dembiyo ood hore u gashay balse lagaa cafiyay awgeed. Sababahan dambe, waxaa loo yaqaan "marmarsiiyada la-xaaraantimeeyay" oo sharciga quursiga ah.

Qof waliba ayaa xil ka saaran dhoorista xuquuqda aadamiga. Qofkasta waxaa ku waajib ah inuu dhowro xuquuqda aadamiga dadka kale, isla markaana ka dacwoodo hadii isaga ama cid kale la xaqiro ama la aflagaadeeyo.

Waa maxay qof-takoorid?

- Waa fal xaqiraad ah oo qof kale loo geysto, iyadoo la duudsinayo xuquuq uu leeyahay, ama lagu qasabayo inuu fuliyo wajibaadyo kallifaad ku ah, iwm., iyadoo lagu xigleynayo astaamo uu leeyayhay ama loo nisbeenayo inuu leeyahay. Ujeeddada qofka uu leeyahay oo keliya ma aha sharuudda lagu muujin karo jiritaanka fal- takoorista.

- Qof kasta xaq buu u leeyahay inuu ka badbaado xaqiraad iyo aflagaddoba marka uu joogo goob shaqo ama goobaha adeegga ee dadweynaha u dhexeeya (sida dukaannada, maqahiyada, basaska, cisbitaalada, iskuulada, iyo meelaha kale ee dadweynuhu leeyahay). Sodoo kale, marka uu joogo gurigiisa, ama ururrada uu xubinta ka yahay.

Maxaa loola jeedaa aflagaaddo (harassment)?

- Aflagaaddada waa nooc ka mid ah xaqiraadda. Waxaa aflagaaddada ka mid ah marka qofka lagula kaco dhaqan xumo, faallo uu dhibsan karo sida yasniinta oo kale. Aflagaaddo waxey dhacdaa marka qofka uu yiraahdo eray uu ogyahay inuu qofka kale uu dhibsan karo.

- Mithaalada aflagaadada midib-takoorka ah (racial harassment) waxaa ka mid ah marka la caay ama xifaalo kajan ah loo geysto qofka jinsigiisa. Mithaalada aflagaaddada jinsiga la xiriira (sexual harassment) waxaa ka mid ah marka lasoo ban-dhigo sawiro cawro ah oo kaddibna faloo aan habooneyn oo jirkaada ku saabsan la raaciyo.

Waa maxay “takoorid dadban” iyo “takoorid kama-ah”?

- *Takoorid dadban* waxey dhacdaa marka fulinta falka xaqiraadda ah loo xilsaaro cid kale. Mathalan, haddii milkiilaha guriga uu amar ku siiyo maamulaha guriga in uusan gurigiisa marnaba ka ijaarin qof caruur wata ama qof curyaan ah.

- *Takoorid kama-ah* waxay dhacdaa marka ujeeddada qorshaha ama fulintiisaba aanu marnaba aheyn in qof lagu xaqiro, haseyeeshee marka fulintiisa lagu dhaqaaqay ay yeelatay natiijo ka duwan, maadaama ay fal-takooris iyo xaqiraad ay kala kulmeen koox ama kooxo la rabay inuu sharcigu badbadsho. Mathalan, haddii maamula hey’adda uu nidaam guud soo saaro oo shaqaalahiisa kaga mamnuucayo iney madaxa dabooshaan, waxaa dhaci kareysa in amarkaasi guud uu xadgud ku noqdo qofka diinitiisa fareyso inuu madaxa xijaabto.

Maxaa loola jeedaa “hagaajin” iyo “kallifaad dheeraad-ah”?

- Maamulaha, milkiilaha ama addeg-bixiye kasta (sida cisbitaalada) waxaa waajib ku ah inuu markasta “tilaabooyinka ku haboon ka qaato ama uu beddelo” nidaamka iyo dhaqannada jira, si’ loo sugo in dadka saameynayo nidaamkaas ay si xaq ah ama awood siman ay u wada helaan. Hagaajinta maamulka ama isbeddelka la rabo in nidaamka jira lagu sameeyo waxey markasta ku xiran tahay baahiyada kala duwan oo ay dadku qabaan. Mathalan, haddii ay jiraan dad curyaan ah oo gaari-socodka isticmaala, waa in loo sameeyaa wadooyin u gaar ah oo ay mari karaan; sidoo kale waa in leys waafijiyo saacadda-shaqada iyo ka hakashada shaqada iyo baahida gaarka ah ee shaqaalaha; haddii maamulka uu qof dhagool ah lala kulmayo, waa in qofkaasi loo diyaariyaa xirfadle gacan-ka-hadalka ka tarjumi kara; waa in qofkasta lagu meeleyo howl iyo xil uu qaban karo.

- Waa in maamulka uu markastaa sameeyaa hagaajinta iyo tixgelinta loo baahan yahay, siiba marka hagaajintaasi ayan keeneyn “kallifaad dheeraad ah”(undue hardship). Waxaa qeexidda jiritaanka xaalad “kallifaad dheeraad ah” aalaaba xaddida sadexda sabab ee kala ah: jiritaanka kharash xaddhaaf ah; lacagta loo baahan yahay in howsha lagu fuliyo oon la heli kareyn; ama haddii sameynta mashruucaasi ay khatar u keeni karto caafimaad ama amniga dadka. Mathalan, maamulka hey’adda ama adeeg-bixiyuhu marna cudur-daar kama dhigan karo mana cuskan karo qodobka ah “kallifaad dheeraad ah,” isagoo damacsan inuu ka gambado kharashka ku bixi kara suuli oo dadkoo dhan wada isticmaali karaan. Waxaa lama huraan ah, in hey’adda ama sharikadda ay markasta cadeyn karto in kharashka howsha ku bixi kara uu yahay mid xad-dhaaf ah oo khasaaro lixaad ah u keenaya samasocodka ganacsigaasi.

Jiro-maskaxeedda ma curyaanimo baa?

- Haa, sida Sharcigu qabo jiro-maskaxeedka waa curyaanimo. Qofna laguma xaqiri karo, ama laguma xumeyn karo jiro uu qabo awgeed ama cisbitaal uu bukaan ahaan ugu jiro awgeed.

Maxaa kaloo sharcigu iga badbaadinayaa?

- Haddii kaddib markaad si’ cad oon gabasho laheyn u weydiisatay xuquuqda sharciga kuu baaneeyay, uu maamulka kuula dhaqmo si ka duwan habka ay dadka kale ula dhaqmaan, arrintaasi waa mid “*aar-goosi*.” oo sharciga qilaafsan. Sharciga wuu mamnuucayaa falka “aar-goosiga ah” ama hanjabaada aar-goosiga ah. Sidoo kale, sharciga wuxuu mamnuucayaa in qofna logu xaqiro diidmo uu diiday in dad kale xaqiraad loo geysto, ama lagu xaqiro ka dhiidhiyid ay ka dhiidhisay xodxodasho lala yimid.

Maxaad ka qaban karta haddii aad la kullanto xaqiraad ama aflagaado?

- Haddii lagu xaqiraad ama lagu aflagaadeeyo:

  b) U sheeg qofka fal-xumada sameeyay in dhaqankiisu uu yahay mid xun oo la oggolaan karin, kana codso inuu ficillkaasi uu joojiyo. Haddii ay qof ahaan kugu adkaato, in tilaabadaasi qaadato, ka codso qof saaxiib ah inuu goob-joog arrintaasi ka ahaado.

  t) Qoraal xusuus qor ah ka sameey:
    - Waxa dhacay
    - Goorta arrintu dhacday
    - Halka ay ku dhacday
    - Waxa leys yiri ama la sameeyay, ama cidda tiray ama sameysay
    - Cidda aragtay waxa dhacay
    - Waxa aad ka qabatay marka arrintu dhacday

  J) Haddii falka xaqiraadda ama aflagaaddada ay ku dhacdo goob shaqo ah, aadna xubin ka tahay urur shaqaale, deg-deg ula hadal wakiilka ururka shaqaalaha. Haddiise aad ku jirto cisbitaalka maskaxda, degdeg ula xiriir mas’uuliyiinta goobta, ama U-doodaha Bukaanka si aad xogogaal ugu nooqoto habka loo jiheyn karo cabashada xaqiraadda ama aflagaaddada.

- Haddii aad dareensan tahay in arrtintu ay sii jiitameyso oo aanu la siin culeyska ay mudneyd, waxaad toos dacwadaada ugu gudbin karta Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga ah.

Sidee arjiga dacwadeyda xuquuqda aadamiga ugu gudbin karaa Maxkamadda?

- Haddii lagu xaqiray ama lagu aflagaadeeyay midibkaada, jinsigaada, curyaanimada awgeed, ama sababaha ku xusan Sharciga, waxaa xaq u leedahay inaad arji dacwad ah u gudbisid Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario.

- Maxkamadu waxey dhageysataa go'aana ka gaartaa arjiyada xuquuqda aadamiga. Habka dacwad qaadisteeda loo abaabulay waa mid fudud oo aan laheyn rasmiyaadka maxkamadaha caadiga ah.

- Marka aad dacwadaada xereysid, waxey qiyaastii qaadan kareysaa muddo hal sano ah si go'aan looga gaaro. Haseyeeshee, haddii ay barbarrada isku waafaqaan, waxaa dhici karta in arrinta lagu ku xalliyo qaab dhexdhexaadin ah.

- **Xarunta Gargaarka Sharuucda ee Xuquuqda Aadamiga** waxey kaa gargaarikareysa xereynata iyo meelmarinta arjigaada. Xaruntu waxey leedahay 22 qareeno iyo howlwadeeno kale oo xirfad gaar ah u leh xuquuqda aadamiga. Dadkaasi waxey ku siinayaan adeegyo iyo talooyin sharciyeed oo lacag la'aan ah. Qareenada iyo howlwadeenaduba waa kuwa xur ka ah maxkamada iyo maamulka dowladuba. Sidaas darteed, waxey kaa caawini karaan dhameystika arjiga dacwadaada waxeyna ku siin karaan talooyinka sharciyeed ood u baahan tahay. Sidoo kale, waxey dadkaasi iyagoo kaa wakiil ah, ay la xiriiri karaan dadka ama hey'adaha aad dacwadda ku oogtay iyo maxkamaduba, waxeyna wakiil idman kaaga noqon karaan dhegeysiyada leydun ku dhexdhexaadinayo adiga iyo barbarada kale.

Arji Xereynta

- Waa inaad dacwadaada ku xerysaa muddo **hal san** gudaheeda ah ee taariikhda fal-takoorku dhacay. Haddii ay dhacdooyinku ahaayeen kuwa dhowr ah, waa inaad dacwadaada ku xerysaa muddo hal san gudaheeda ee marka shilka ama fal-takoorka ugu dambeeyay dhacay. Maxkamadu waxey awoodaa iney waqtigaasi kuu kordhiso, haddii aad horgeyso sabab maangal ah oo kalifi kara waqti kordhinta, sida adigoo cisbitaal ama jeel ku jiray awgeed, ama adigoo sannad kadib aad xogogaal u noqotay in dhacdadaasi ay tahay mid fal-takooris ah.

- Howlwadeennada maxkamada waxey ku weydiin doonaan magacaada, deggaankaada, teleefoonkaada, iyo haddii aad jeceshahay in dokumentiyada laguugu soo diro boostada, emailka iyo fakskaba. Kadib, waxey kuu soo diri doontaa xirmo dokumentiyo ooy ka mid yihiin arjiga dacwadda iyo tilmaanbixiye (guide). Sidoo kale, waxaad Bogga Internedka Maxkamadda (Tribunal website), kala soo bixi kareysaa dokumentiyada lasoo xusay, ama waxaad adigoo istacmaalaya habka "smart form" ee isla Bogga Internedka, ayaad si toos ah elektronik ahaan ugu xereysan kartaa arjiga dacwadaada.

- Waa inaad arjigaada aad si cad ugu qortaa falka dhacay (cidda sameeysay, goorta ay dhacday, goobta ay ku dhacday); side shilku uu shaqsi ahaan kuu saameyay, iyo mag-dhawga aad weeydiisaneyso. Sidoo kale, waa inaad si cad ugu xustaa: magaca qofka iyo sharikadda, ama ururka iyo wasaaradda dowladda oo aad dacwadda ku oogeysid. Waa inaad arjigaada soo raacisaa dokumentiyada maragmuujinta ah oo aad eeddaada saldhig uga dhigeysid, iyo magacyada marqaatiyada oo shilka dhacay goob-joogga ka ahaa. Liiska magacyada marqaatiyada waa sir, sidaas darteed looma gudbin doono cidda eedda ku socoto (Respondent).

- Maxkamadu waxey kaloo leedahay hab qarsoodi ah oo ay ku ilaaliso xogta shaqsiyaadka u gaarka ah (privacy policy). Mararka qaarkood waxey xaqiijineysaa in shaqsiga magaciisa aan lagu muujin waraaqaha ay dadweynuhu akhrisan karaan. Waa inaad maxkadda horay u ogeysiisaa waxyaabaha xasaasiga kuu ah, si ay uga tabaabusheystaan ugana taxadiraan baahinteeda. Arjiilaha wuxuu kaloo kari karaa in xereynta dacwadiisa uu u wakiisho qof qareen ah, qof saaxiib ama ehel ah oon lacag ku qaadaneyn. Arintaan waxey arjiilaha u sugeysaa in cinwaankiisa uusan marnaba ogaan qofka dacwada ku socoto.

Maxaa dhici kara kaddib marka aan arjiga dacwadeyda xereeyo?

- Kaddib marka ay arjiga ay helaan, Maxkamadda waxey hubineysaa in arjiga uu dheystiran yahay, ayna dacwadu hoos imaneyso Sharciga xuquuqda aadamiga u degsan. Waxaad heli doontaa awood aad ku saxdo qaladyada arjgaada.

- Marka arjigaaada la oggolaado, Maxkamadu kaddib marka ay arjigaada ka masaxeysaa liiska magacyada marqaatiyada iyo cinaawaanada meelaha lagaala soo xiriiri karo, ayey waxey nuqul ka mid ah arjigaada u gudbineysaa cidda la eedeeyay. Sidoo kale, waxey ka codsaneysaa eedeysanaha inuu kasoo jawaabo isagoo soo dhameystirayo dokumentiga eed-celinta ah (Response form).

- Waxaad laguu soo gudbinayaa jawaab kasta oo eedeysanuhu soo gudbiyo, waxaana lagu siinayaa fursad aad ugu jawaabtid.

- Haddii ay labada barbar isku afgartaan, waxaa laydin qabanayaa shir dhexdhexaadin ah oo agaasime doona garsoore ka tirsan maxkamadda. Waa kullan qarsoodi ah oo ujeeddadiisu tahay in lagu xalliyo arrinta labada barbar isku heysta inta aan weli maxkamadda loo gudbin.

- Haddii kullanka dhexdhexaadinta lagu guuleysan waayo, Maxkamadda ayaa kiiskiina dhegeysan doonta kana gaari doonta go'aan.

Halkee ka heli karaa cid iga caawinta qorista arjiga?

- Haddii aad u baahato in arjiqorista lagaa caawino, lasoo xiriir Xarunta Dhexe ee Shuruucda Xuquuqdaada Aadamiga.

- Waxaad kaloo qabsan kartaa qareen kuu gaar ah, ama qof saaxiib ah ama ehel ah oo wakiil kuu noqda. Haddii aad dooneyso inaad qorato qareen kuu gaar ah balse dakhliga lacagtaada ay yar tahay, waxaad suuragal ah inaad xaq u leedahay shaadooyinka gargaarka (legal aid certificate) oo kuu suurtagelinaaya inaad hesho qareen lacag la'aan ah.

- Si' aad si buuxda uga qeybgasho doodda maxmadda, ama kullanka dhegeysiga dhexdhexaadinta, Maxkamadda waxey kuu diyaarineysaa mutarjun-luqadeed ama mutarjunka calaamadaha dhagoolka. Waxaase loo baahan yahay inaad xafiiska diiwangelinta maxkammada aad codsigaada mutarjunka u gudbisid inta kullanka uusan biloowan ka hor.

Maxaa maxkamadda go'aamin kartaa?

- Haddii Maxkamadda ay u cadaato in xaqiraad ama colaadin laguugu sameeyay waxey eedeysanaha ku amri kartaa inuu:
    - Lacag magdhow ah oo **"**lagaaga xaal-marinaayo" dhaawaca loo geystay sharaftaada, dareenkaada iyo heybadaadaba;
    - Lacag magdhow ah oo "lagaaga xaal-marinaayo" qasaaraha lacageed oo kaa soo gaaray ijaarka laguugu kordhiyay awgeed ama mushaharada aad lumisay.
- Maxkamadda waxey kaloo eedeysanaha ku amri kareysaa in laguugu celiyo jagadii iyo xilkii aad heysay dacwada ka hor laguugu celiyo. Mathalan, haddii dacdada awgeed aad shaqada u lumisay, maxkamadda waxey amri kareysaa in shaqada dib laguugu celiyo.
- Waxey kaloo maxkamadda awoodaa, iyadoo danta guud eegeyso, in sharikadda ama dowladda ay ku amarto iney beddelaan sharikadda maamulkeeda iyo dhaqakeedaba, ama ay kusoo rogto iney sharikadooda ka hirgeliyaan tababaro wacyigelin ah ee xuquuqda aadamiga. Arjiga dacwadaada ayaad tilaabooyinkaasi horay ugu codsan kareysaa.

Maxkamadda Xuquuqdaada Aadamiga ma diidi kareysaa iney arjieyga oggolaato?

- Maxkamadda waxey dhageysaneysaa oo keliya dacwooyinka ku sifoobi kara xaaladaha hoos yimaada sharuucda u degsan Gobolka Ontario, Arrimahaasi waxaa guud ahaan ka mid ah xagga shaqaaleynta, qandaraasyada, gaadiidka dadweynaha, guriyeynta, caafimaadka, waxbarashada iyo adeegyada kale sida dukaanada iyo makhaaxiyada.
- Maxkamadda wey diidi kareysaa iney qaaddo dacwada haddii:
    - Goobta flaka xaqiraadda ku dhacay ay tahay meel ka baxsan Gobolka Ontario (inkastoo ay jiri karaan xaaladoo gaar ah oo ka reeban).
    - Nooca dacwadaada aysan hoos imaneyn awood-maamuleedka (jurisdiction) sharuucda Ontario, ama dacwadaada ay tahay mid maaddo ahaan quseysa sharuucda Federaaliga. Arrimaha quseeya sharuucda federaaliga waxaa ka mid ah: safarrada dayuuradaha, banuukta, telefishanka iyo radiyowga, sharikadaha telefoonada, waaxaha dowladda federaaliga ah iyo hey'adaha federaaliga ah. Dacwooyinka quseeya hey'adaha lasoo xusay waxaa awood ahaan dhageysta Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga ee Kanada, iyadoo u cuskanaysa Sharciga Xuquuqda Aadamiga Kanada. Haddii aad u baahato in arrimahaas lagaa gargaaro, kala soo xiriir Guddiga Xuquuqda Aadamiga taleefoonka ah 1-888-214-1090, ama kala soo xiriir cinwaanka Internedkana: http://www.chrc-ccdp.ca/
    - Aad mar hore dacwadaada u gudbisay Maxkamadda Rayidka ah, ama cabashadaada u mar hore u gudbisay Ururka Shaqaalaha ama Guddiga Milkiilayaasha Guryaha. Haseyeeshee, waxaa mararka qaarkood dhici karta in Maxkamadda ay dacwadaada oggolaato, laakinse ay dhegeysigeeda dib u dhigato illaa ay he'adahii aad hore ugu gudbisay ay kasoo dhamaato. Waxaase shardi ah inaad la timaado maragmuujin dabadeedna aad maxkamadda si cad ugu qanciso in hey'adahaasi ay si quman oo maangal ah u eegin nuxurka dacwadaada.

- 30ka Juun 2008 ka hor aad dacwadaada u gudbisay Guddigii “Hore” ee Xuquuqda Aadamiga.

Waa maxay fursadaha kale oo sharci ahaan ii banaan haddii arjiga dacwadeyda aan horay ugu gudbiyay Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga?

- Waxaa suuragal ah in dacwaddii aad hore u xereysay ay saameeyn ku yeelan kareyso fursadaha kale. Haseyeeshee waxaa surtagal ah iney jiri kaaran fursado kale, waxaase lagama maarmaan ah in waaddada kuu haboon aad kala tashato qareenkaada.

Maxaa dhici kara haddi aan dacwadeyda aan hore ugu qaddimay Guddiga Xuquuqda Aadamiga?

- Haddii aad dacwadaada u gudbisay Guddiga Xuquuqda Aadamiga 30ka Juun 2008 ka hor, maamulkeedana lagu dhexjiro, galka dacwadaada waa mid lagu tilmaami karo “marxalad kala-guur.” Go’aanka sida dacwadaada laga yeeli lahaa adiga ayey kugu xiran tahay. Fursadaha kuu furanse waa kuwa hoos ku cad:

  - Waxaad dooran kartaa in baaritaanka dacwadaada uu Guddigu uu sii wado. Guddiguse wuxuu dacwadaada sii maamuli karaa illaa 31ka Disember, 2008.

  - Waxaad dooran kartaa in dacwadaada loo gudbiyo Maxamadda, waxaase lagama maarmaan ah inaad arrintaas go’aan ka gaarto 31da Disember, 2008 ka hor. Maxkamadda waxey adeegsan doonta shuruucdeedad u gaarka ah oo ka mid ah in labada barbar oo is-dacweyneyso leysugu keeno dhageysi lagu dhex-dhexaadinayo, kullankaas oo ah mid qasab ah. Xalkan ma’aha midka ugu door-roon, siiba haddii kiisku uu yahau mid culus oo labada barbar ay isku diidan yihiin sida falka u dhacay, ama markhaati ahaan loogu yeeridoono dad Qubaraa ah.

  - 31da Disember, 2008 kaddib maxkamadu waxey tilmaamaantay in dacwooyinka jira loogu maamuli doono nidaam deedejiya xallintooda si go’aan looga gaaro illa 30ka Juun, 2009. Kiisaskan waxey u badnaan doonaan kuwa dhex-dhexaadinta.

  - Laga bilaabo 30ka Juun, 2009, waa inaad dacwadaada kasoo rartaa Guddiga Xuquuqda Aadamiga una soo gudbisaa Maxkamaada Xuquuqda Aadamiga, haddii kale waa la oodayaa. Adiga ayaa ka mas’uul ah xajiinta usoo beddelida kiiskaada Maxkamaada Xuquuqda Aadamiga.

- Si lagaaga caawino soo rarista kiiska, la soo xiriir Xafiiska Soo Rarista iyo Diiwaangelinta (Tribunal Transfer Registrar) oo telefoonkiisa yaahy (416) 314-8419. Haddii aad doneyso mac’luumaad dheeraad ah ka booqo Internedka bogga cinwaankiisu yahay: http://www.ohrc.on.ca/en/commission/mission/options/.

Cinwaanada Muhiimka ah:

- Waxaad Isniin illaa Jimco saacadaha xafiisku furan yahay kasoo wici kartaa Maxkamadda lambarka ah (416) 326-1519 (ee Toronto) ama telefoonka lacag-la'aanta ah 1-866-598-0322. Dadka dhagoolka ah (TTY) waxey soo wici karaan lambarka (416) 326-2027 (ee Toronto) ama telefoonka lacag-la'aanta ah 1-866-607-1240. Haddii aad doneyso mac'luumaad dheeraad ah booqo Internedka bogga Maxkamadda oo ah: http://www.hrto.ca.

Ugu soo gudbi Maxkamadda arjiyada dacwooyinka cusub cinwaanka ah:

- Richard Hennessy, Registrar
  Human Rights Tribunal of Ontario
  655 Bay Street 14th Floor,
  Toronto, ON M7A 1X8

- Waxaad kaloo arjigaada ugu soo gudbin kartaa xagga Internetka cinwaanka ah: HRTO.Registrar@ontario.ca ama Taar (Fax) ah (416) 326-2199 ama (telfoonka lacag-la'aanta ah): 1-866-355-6099.

Waxaa xereynta arjiga dacwada kaa caawini kara:

- Xarunta Dhexe ee Shuruucda Xuquuqda Aadamiga
  400 University Avenue, 7th Floor, Toronto, ON, M7A 1X8

Tel (Toronto):	416-314-6266
Tel. Lacag-la'aanta:	1-866-625-5179
Tel Dhagoolka (Toronto):	416-314-6651
Tel Dhagoolka Lacag-la'aanta:	1-866-612-8627
Bogga Internetka (Website):	www.hrlsc.on.ca

Dacwooyinka Qabyada ah ama Kuwa Gudiida soo gudbiyay lasoo xiriir:
Patricia M. Grenier, Registrar – Transition
Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario
655 Bay Street, 14th floor
Toronto, ON M7A 2A3

Tel (Toronto):	(416) 314-8419
Tel (Lacag-la'aanta):	1-866-598-0322
Tel Dhagoolka:	(416) 314-2379
Tel Dhagoolka (Lacag-la'aanta):	1-800-424-1168
Taar (Fax):	(416) 314-8743
Email:	HRTO.Registrar-Transition@ontario.ca

Su'aalaha ku saabsan xuquuqda bukaanka cudurrada maskaxda miyaad qabtaa?

Haddii aad wax su'aalo aad qabto, la xiriir Xafiiska u Dooda Bukaanka Cudurrada Maskaxda ee magaaladaada, ama kasoo wac Xafiiska Dhexe ee Dooda Bukaanka Cudurrada Maskaxda, telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-578-2343.